



HoA Groundwater for Resilience Project - Somalia (Abaartire)



Qaybta Soomaaliya ee mashruuca *Horn of Africa Groundwater for Resilience*, (**Abaartire**), waa hindise US\$30 milyan ah oo uu maalgelinayo Sanduuqa Horumarinta Caalamiga ah ee Bangiga Adduunka (IDA) ayna fulineyso **Wasaaradda Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha ee Xukuumadda JFS**.

Ujeedada mashruuca waa in sare loo qaado **isticmaalka iyo maareynta muddada fog ee biyaha dhulka hoose** oo ay ka faa'iideystaan bulshada Soomaaliyeed, si loo helo **xal joogto ah oo looga baxo abaaraha soo noq noqda iyo biyo yarida**.

Maalgelinta

US\$30 milyan (World Bank)


Hay'adda Fulinaysa

Wasaaradda Tamarta & Kheyraadka Biyaha Xukuumadda JFS.

Bartilmaameedka

Deegaanada dhaca xuduudaha iyo bulshada nugul

Goobaha Laga Hirgelinayo & dadka ka Faa'iideysanaya



Mashruuca waxa uu xoogga saarayaa inta badan Dowlad Goboleedyda sida; **Galmudug, Hirshabelle, Jubbaland, Puntland, Koonfur Galbeed iyo Somaliland**.

Waxaa si toos ah uga faa'iideysan doona qiyaastii dad gaaraya **185,500 oo qof** oo ay noloshoodu ku tiirsan tahay beeraha iyo xoolaha, kuwaas oo ay biyo yaraani hayso.

- **Bulshada nugul:** Haweenka maanta waxaa saaran culeyska ugu badan ee biyo dhaaminta; Abaartire waxa uu mudnaanta siinayaa ka dul qaadidda culeyskaas iyo baahiyahooda kale ee gaarka ah.
- **Taageero nolol-maalmeed:** Mashruucu waxa uu ilaalinayaa xoolaha iyo hab-nololeedka reer guuraaga iyo beeraleyda, kuwaas oo ah laf-dhabarta dhaqaalaha miyiga.
- **Xal nidaam ku dhisan:** Mashruucu waxa uu hoos u dhigayaa ku tiirsanaanta gaadiidka biyaha dhaamiya ee ay lacagta badan ku baxdo (water trucking), gaar ahaan xaafadaha ku hareeraysan magaalooyinka.

Guulaha iyo Natiijada la filayo

- **Helidda biyo tayo leh:** Ilo biyo oo la isku halleyn karo, loona isticmaalo guriyaha, xoolaha iyo wax-soo-saarka yaryar.
- **Sare u qaadidda Adkeysiga:** In Bulshadu awood u yeelato in ay iska caabiyaan abaaraha iyo Isbedelka Cimilda, si ay hoos ugu dhigaan halista saboolnimada.
- **Yaraynta khilaafaadka:** Dhisidda Maamul loo dhan yahay, hufan oo biyaha ah, si looga hortago isku dhacyada iyo barakaca ka dhasha kheyraad yarida.
- **Lahaansho iyo Ka qeyb-gal loo dhan yahay:** Bulshada oo loo tababarro hawlgalinta iyo dayactirka nidaamyada biyaha, si ay is-kood ugu maamulaan, muddo dheerna ay ugu faa'iideystaan.

SADDEXDA TIIR EE MASHRUUCA

Tiirka 1 - Bixinta Adeegyo Biyaha Dhulka hoose oo Cid Walba Gaara (US\$15M)

Sahminta kaydada biyaha, qodista ceelal cusub, dayactirka ceelasha jira, iyo biyo keydin u adkeysta isbedelka cimilada.

Tiirka 2 - Dhisidda Nidaam Wadajir ah oo lagu Maareeyo Biyaha Dhulka Hoose (US\$4.6M)

Tiirka 3 - Maareynta Mashruuca, kormeerka, iyo Tababarada (US\$6.5M)



HoA Groundwater for Resilience Project - Somalia



gw4rpSomalia